# Cutubka

7^{aad}

JOOMATTARIGA IYO CABBIRAADA

UJEEDDOOYINKA CUTUBKA

Cutubkani marka uu dhamaado ardaydu waxay awoodi doonaan iney:

- ➢ fahmaan fikradaha aasaasiga ee ku saabsaan saddexagallada xaglaha quman.
- ➢ adeegsadaan kamidah aragtiyada muhimka ah ee saddexagalada xagalah quman.
- ➢ gartaan xeerarka aasaasiga ee saamiyada tirignomatariga
- ➢ gartaan noocyada kala duwan ee Bayraamidyada iyo qaybaha ay wadaagaan.

TUSMOOYINKA MUHIMKA AH

7.1   Aragtiinada ku saabsan saddexagalada xaglaha quman

7.2   Hordhaca tirigonomatariga

7.3   Shaxannada adkaha ah

Furaha Tibxaha

*Sookoobida Cutubka*

Nakhtiinka layliska

HORDHAC

Cutubkni wuxuu leeyahay saddex cutub hoosaad. Labada cutub-hoosaad ee ugu horeeya waa fikradaha iyo natiijooyinka laxiriira dhinacyadaiyo xagal aha saddexagal qummaan.Gaar ahaan, cutubhoosaadka ugu horeeya wuxuu leeyahay laba aragtiino oo caan ah "Aragtiinka Euclid iyo aragtiinka baytagoras". Kan labaadna wuxuu leeyahay saamiyaada tirigonometeriga ee saddexda ah: Sayn, Kosayn iyo taanjat ee xagasha fiiqan ee saddexagalka xagasha quman kuwaas oo ah barta ugu muhimsan ee nuxurka. Cutub-hoosaadka saddexaad waxa ku jira labo shaxanada adkaha ah Bayraamid yada iyo toobinada.Cutub-hoosaad kasta wuxuu u habaysan yahay isaga oo la raaciyay soo bandhigidda taariikhdiisa.

7.1 ARAGTIINADA SADEXAGALLADA XAGLAHA QUMAN

Masalo Furan:

Jaantuska7.1*wuxuu muujinaya gobolo dhul ah ooleh saansaan saddexagal iyo saddex laba jibbaarane dhulkaas oo ay leeyihiin afar beeralay A, B , C iyo D.*

1   *midkoodee baa leh dhulka bedkiisu ugu weyn yahay?*

2   *ma jiraan kuwa leh dhulbedkoodu is le'eg yahay?*

3   *haddii la isku daro beerta A iyo B iyo beeraha C iyo D lammaanahee baa yeelanaya bedka wayn?*

Jaantuska7.1

Masaladaa kore waxaa loo dhigayaa inay kaacaawiso inaad xusuusato baytagoraskii caanka ahaa "waa aragtiin loo isticmaalo adeegsiyo badan". Sidoo kale waxay gundhig u tahay natiijooyinka kala duwan ee la xiriira tirigonomatariga iyo bedadka.

7.1.1 Aragtiinka yuklidh iyo Weydaarkeeda

Xusuus taarikheed:

Euclid 350 B.C wuxuu ahaa xisaabiyahan Giriigah. Wuxuu qoray aasaasyo, ah 13–xidhmood oo ku saabsan xeerarka joomatariga iyo astaamaha tirooyinka.

Euclid

Hawl-galka 7.1

Sawir saddexagal xagal qumman ABC, in jeex joogga saddexagalkadhinaca shakaalkaAB sida ka muuqata Jaantuska7.2 ka dibna ka jawaab mid kasta oo kamidah su'aalaha soo socda.

Jaantuska7.2

1 Imisasaddexagal xagal qumman oo cusub ayaa samaysmay?

2 Tax saddexagallada xagal qumman?

3 Caddee xaglaha mid kasta oo kamidah saddexagallada cusub kuwaas oo isku sargo'an.

    b $\angle A$ **t** $\angle B$

4 Falanqeeya isku sargona antooda

    b $\triangle ACD \sim \triangle ABC$ **t** $\triangle CBD \sim \triangle ABC$

5 Isticmaal natiijada falanqayntii su'aasha 4 si aad u muujiso

    b $\dfrac{CB}{BD} = \dfrac{AB}{BC}$ iyo waliba$a^2 = cb_2$

    t $\dfrac{AC}{AD} = \dfrac{AB}{AC}$ iyo waliba$b^2 = cb_1$

Falanqayntii aad ku samayseenhawlgalka7.1waxay caddayn u ahayd aragtiinka Euclid. Waxayna odhanaysaa sida soo socota:

Aragtiinka 7.1 (Aragtiinka yuklidh):

Haddii joogga loo jiido dhinaca shakaalka saddexaglka xagasha qumman, markaa labajibbaarka lug kasta wuxuu le'eg yahay taranta shakaalka iyo lugta saddexagalka taas ooaan ahayn joogga sadexagalka lagu siiyay.

Sikale udhigid: ka soo qaad ΔABC inuu yahay saddaxagal xagalqumman oo $\overline{CD}$ ay tahay joogga ku qotoma shakaalka AB. *Fiiri* Jaantuska 7.3.

Marka   **i** $a^2 = cb_2$

       ii $b^2 = cb_1$

Jaantuska 7.3

Xusuusnaw: *Marka laga eego dhinaca isu ekaanshaha ee ΔACD iyo ΔCBD. Waxaa raacaya taa: $CD^2 = b_1b_2$ tan waxaa loo yaqaana "Aragtiinka joogga".*

Tusaale 1: Ka soo qaad ΔABC inuu yahay saddaxagal xagal qumman, shakaalkiisuna yahay $\overline{AB}$ jooggiisuna $\overline{CD}$ kaas oo ku qotoma shakaalka $\overline{AB}$. Haddii AD = 3sm, BD = 12sm, Raadi dhererka mid kasta oo kamida dhinacyadan soosocda.

   b $\overline{AC}$ **t** $\overline{BC}$ **j** $\overline{DC}$

Furfuris: Talaabada ugu horaysa waa in lasawiro ΔABC. Fiiri Jaantuska 7.4

AB = 3sm + 12sm = 15sm.

b = AC, a = BC, b_1 = 3sm, b_2 = 12sm iyo c = 15sm.

Adeegsiga aragtinka Euclid wuxuu ina siinayaa,

Jaantuska 7.4

b $b^2 = cb_1$ $= 3sm \times 15sm$ $= 45sm^2$

$b = \sqrt{45}$ sm$= \sqrt{9 \times 5}$ sm $= 3\sqrt{5}$ m s

t $a^2 = cb_2$

$= 12$ sm $\times 15$ sm $= 180$ sm^2

$a = \sqrt{180}$ cm $= \sqrt{4 \times 9 \times 5}$ cm $= 2 \times 3\sqrt{5}$ cm $= 6\sqrt{5}$ cm

j $DC^2 = b_1b_2$

$= 3sm \times 12$ sm $= 36$ sm^2

$DC = \sqrt{36}$ sm $= 6$ sm

Tusaale 2: Joogg ku qotama shakaalka saddexagal xagal quman ayaa u kala qaybiyey shakaalka laba xaariijimood oo dhererkoodu yahay 1 sm iyo 8 sm. Raadi dhererada lugaha.

Furfuris: ka soo qaad $\overline{CD}$ inay tahay joogga ku qotoma shakaalka $\overline{AB}$ ee saddexaglka xagasha qumman.Fiiri Jaantuska 7.5

$AC^2 = AD \times AB$ $= 1$ sm $\times 9$ sm $= 9$ sm^2

$AC = 3$ sm

$BC^2 = BD \times AB$

$= 8$ sm $\times 9$ sm $= 72$ sm^2

$BC = \sqrt{72}$ sm $= 2 \times 3\sqrt{2}$ sm $= 6\sqrt{2}$ sm


Jaantuska 7.5

Tusaale 3: Saddexagal xagal qumman dhererka joogga loo jiiday dhinaca shakaalka ayaa ah 9sm. Haddii dhererada xariijimaha shakaalka ay yihiin k smiyo4 ksm, raadi dhererda lugaha saddexagalka.

Furfuris: fiiri Jaantuska 7.6 ka dibna adeegso aragtiinka joogga:

$9^2 = k \times 4k$

$81 = 4k^2$

$k^2 = \dfrac{81}{4}$

Jaantuska7.6

Sidaa darteed, $k = \sqrt{\dfrac{81}{4}} = \dfrac{9}{2} = 4.5$ sm

$c = AB = k$sm $+ 4k$ sm $= 5k$ sm $= 5\,(4.5)$ sm $= 22.5$ sm

$a^2 = (4k) \times 5k = 4\,(4.5)\,(22.5)$ sm

$\quad = 4\,(9 \times 0.5)\,(15 \times 15 \times 0.1)$ sm^2

$\quad = 4 \times 9 \times 15^2 \times (0.05)$ sm^2

$a = \sqrt{4 \times 9 \times 15^2 \times 0.05}\ sm = 2 \times 3 \times 15 \sqrt{0.05}\ sm = 90 \sqrt{\dfrac{5}{100}}\ sm$

$\quad = 9\ \sqrt{5}\ sm$

$b^2 = (k \times 5k)$ sm$^2 = 5k^2$ sm $= (4.5)^2$ sm^2

$b = \sqrt{5 \times (4.5)^2}$ sm$^2 = 4.5\ \sqrt{5}$ sm

Shaqo-kooxeedka7.1

Jaantuska7.7 Wuxuu muujinayaa khariidadda waddada isku xidha saldhigyada A, B, C, D iyo E. Lammaaneyaasha waddooyinka, $\overline{AC}$ iyo $\overline{BC}$, $\overline{CD}$ iyo $\overline{AB}$, $\overline{DE}$ iyo $\overline{AC}$ waa kuwo isku qotoma.

AE = 6 km iyo CE = 3 km, haddii bas uu ka dhaqaaqo C una dhaqaaqo dhinaca D, ka dibna uu u dhaqaaqo dhinaca B, C, D, E, A iyo E oo ah dhammaadka raadi wadarta fogaantaa uu socon karo basku.

Jaantuska7.7

Layliska7.1

1 Jaantuska7.8, ΔABC waa saddexagal xagal qumman shakaalkiisuna yahay $\overline{AB}$, $\overline{CD}$ waa joogga ku qotoma shakaalka $\overline{AB}$. Raadi qiimayaasha$a$iyo $b$mid kasta oo kamida qiimayaasha soo socda eeb_1 iyob_2.

b $b_1 = 2$; $b_2 = 6$

t $b_1 = 3$; $b_2 = 6$

Jaantuska7.8

j $b_1 = 1.5$;$b_2 = 2.5$ **x** $b_1 = \sqrt{2}$; $b_2 = 2\sqrt{2}$

2 Raadi dhererka dhinaca maqan mid kasta oo kamida saddexagalada xagllaha qumman ee soo socda.


b   **t**   **j**   **x**

Jaantuska7.9

Weydaarka aragtiinka yuklidh

Hawl-galka 7.2

Jaantuska 7.10, $\overline{CD}$ waa joogga ku qotoma dhinaca $\overline{AB}$ ee ΔABC. Waxaad go'aamisaa ΔABC inuu yahay saddexagal xagal qumman iyo in uusan ahayn.

1

2

3

4

Jaantuska 7.10

Waxaad ku soo aragtay Hawlgalka 7.2 saddexagallada raali galiya aragtiinka Euclid inay yihiin saddexagallada xaglaha qumman. Saddexagallada aan raaligalinin aragtiinka yukliidh maaha saddexagallada xaglaha qumman iyada oo lagu salaynayo xaqiiqdan weydaarka aragtiinka Euclid waa sidan hoos ku qoran.

Aragtiinka 7.2 (weydaarka aragtiinka yuklidh):

$\overline{CD}$ *inuu yahay joogga ku qotoma dhinaca*
$\overline{AB}$ *ee ΔABC.*
Fiiri Jaantuska7.11. *Haddii* $a^2 = cb_2$ *iyo*
$b^2 = cb_1$, *markaa ΔABC waa sadexagal xagasha qummani aytahay barta C.*

Jaantuska7.11

Tusaale5: Jaantuska7.12, wuxuu muujinayaa ΔABC inuu yahay saddexagal xagal qumman.

Furfuris: Sida cad $AB = \dfrac{25}{13} + \dfrac{144}{13} = 13$

$$AD \times AB = \dfrac{25}{13} \times 13 = 25 = 5^2 = AC^2$$

$$BD \times AB = \dfrac{144}{13} \times 13 = 144 = 12^2 = BC^2$$

Jaantuska7.12

Tani waxay cadaynaysaa inΔABC uu yahay saddexagal xagal qumman, iyada oo loo maray weydaarkaaragtiinka Euclid.

Tusaale 6: Jaantuska7.13, wuxuu caddaynayaaΔABC

Inuusan ahayn saddexagal xagal qumman.

Furfuris: AB = 12

AD × AB = 3 × 12 = 36 = 6^2 = AC

BD × AB = 9 × 12 = 108

Laakiin $BC^2 = 64$

Jaantuska 7.13

    Tani waxay caddaynaysaa $BC^2 \neq BD \times AB$

Waxaa raacayaa in ΔABC uusan ahayn saddexagal xagal qumman haddii ΔABC uu ahaan lahaa saddexagal xagal qumman, BC^2 waxay le'ekaan lahayd BD × AB.

7.1.2 Aragtiinka Baytagoras iyo Weydaarkeeda

Qaybtii hore waxaad kusoo baratay aragtiinka Euclid ee saddexagal xagal qumman, Halkan waxaad isticmaali, doontaa xiriirkan si aad u baadhid aragtiinka caanka ah ee Pythagoras.

Xusuus taarikheed:

Pythagoras wuxuu ahaa xisaabyahan Giriig ah, wuxuuna noolaa qarnigii shanaad dhalashadii Ciise ka hor (B.C). Paytagorasiyo saaxiibbadii ayaa markii ugu horaysay aqoonsaday tirooyinka aan lakabka ahayn. Sidookale qarnigii shanaad dhalashadii Ciise ka hor (B.C). Paytagoras iyo ardaydii dhiganeysay iskuulkiisa ayaa waxay darseen 3-4-5saddexagal.

Pythagoras

Hawl-galka 7.3

*Ujeeddada:*Baadhista aragtiinka baytagorasiyada oo lacabbirayo lugaha iyo shakaalka saddexagal xagal qumman.

*Saabaan:*Warqad laba jibbaaran, mastarad mitir ku salaysan, iyo kalkuleetar.

Jidmarin:

1 b Cabbir dhererka (dh)¸ ballaca (b) iyo xaglo-gooyaha d mid kasta oo ka mida walxaha laydiyeed ee soo socda adiga oo qaadanaya.

    i Buuga xisaabta ardayga ee fasalka 8

    ii Sagxadda dhulka ee fasalkaaga.

    iii Sabuurada fasalkaaga.

  t ku guuri Shaxda 7.1 kadibna gali natiijooyinka su'aasha 1b.

	Buuga xisaabta ardayga	Sagxadda qolka	sabuurada
ℓ			
w			
d			
$l^2 + w^2$			
d^2			

Shaxda 7.1

j   Isticmaal natiijada Shaxda 7.1 waxaadna raadisaa xidhiidhka ka dhexeeya wadarta $\ell^2 + w^2$ iyo d^2. Qor hawraarta qeexaysa xidhiidhke ka dhexeeya.

2   **b**   Ku sawir saddexagallo xaglo qumman warqada labajibbaaran dusheeda oo leh dhererada lugahalagu siiyey sida uu muujinayo Jaantuska 7.14.

     i $a = 3$cm ; $b = 4$ sm

     ii $a = 5$cm ; $b = 12$ sm

     iii $a = 2$cm ; $b = 3$ sm

     iv $a = 1.5$cm ; $b = 14.75$ sm

Jaantuska 7.14

t   Cabbir dhererkaJ ee shakaalka mid kasta oo kamida sadexagallada su'aasha 2b adiga oo qaadanaya cabbirka milimitir ee ugu dhow.

j   Ku guuri Shaxda 7.2 waxaadna galisaa natiijooyinka su'aasha 2t.

|	**a**	**b**	**c**	**a² + b²**	**c²**
i	3	4			
ii	5	12			
iii	2	3			
iv	1.5	14.75			

Shaxda 7.2

x   Isticmaal natijada shaxda 7.2siaad u raadiso xiriirka ka dhexeeya wadarta $a^2 + b^2$iyo c^2.

kh   Waxaad qortaa hawraarta sharxaysa xiriirkooda.

In badan waxaad soo baadhay aragtiinka pythagoras. Haddawaxaad baran doontaa caddaynta aragtiinka.

U fiirso saddexagalkan xagsha qumman ABC oo leh joogga ah $\overline{CD}$ kaas oo ku qotoma shakaalka $\overline{AB}$. (*Eeg* Jaantuska 7.15)

Jaantuska 7.15

Marka laga eego dhanka aragtiinka Euclid, waxaad taqaanaa $a^2 = cb_2$ iyo $b^2 = cb_1$ taas oo ah wadarta laba jibbaarrada,

$$a^2 + b^2 = cb_2 + cb_1 = (b_2 + b_1)\, c = c \times c = c^2$$

Tani waa caddaynta aragtiinka baytagoras, taas oo odhanaysa sida hoos ku qoran.

Aragtiinka Baytagoras:

> *Wadarta labajibbaarada dhererada lugaha saddexagalka xagasha qumman waxay le'eg tahay laba jibbaarka dhererka shakaalka.*

Aragtiinka Pythagoras wuxuu qabaa,

$$a^2 + b^2 = c^2$$

Jaantuska 7.16

Tusaale1: Raadi dhererka shakaalka saddexagalka xagasha qumman kaas oo dhererka lugahiisu ay yihin 3 sm iyo 4 sm.

Furfuirs: iyada oo lagu badalayo a = 3 iyo b = 4 hilinka $a^2 + b^2 = c^2$ waxaad helaysaa

$$c^2 = 3^2 + 4^2 = 25$$

Sidaa darted $c = 5$

Dhererka shakaalku waa 5 sm.

Tusaale 2: Haddii dhererka shakaalka saddexagal xagal qumman yahay 13 sm, isla markaana hal dhinac oo kamidah lugahiisu tahay 5 sm, raadi dhererka lugta kale.

A
5 sm
13sm
C
a
B

Jaantuska 7.17

Furfuris: Fiiri Jaantuska 7.17.

Si cad, $a^2 + 5^2 = 13^2$

$a^2 = 169 - 25 = 144$

$a = \sqrt{144} = 12$

Tusaale 3: Raadi dhererka xaglo-gooyaha ee laydi addimihiisu kala yihiin 9sm iyo 40 sm.

Solution: Ka soo qaad ABCD inuu yahay laydi dhererkiisuyahay AB = 40 sm ballaciisuna yahay BC = 9 sm. Markaa ΔABCwaa saddexagal xagal qumman.

D
C
9 cm
A
40 cm
B

Jaantuska 7.18

Fiiri jaantuska7.18

$AC^2 = AB^2 + BC^2 = 40^2 + 9^2 = 1681$

$AC = \sqrt{1681} = 41$

Dhererka xagla-gooyahu waa 41 sm.

Tusaale4: Salaan 6 m ah ayaa lagu tiiriyay darbi ku fadhiya dhul siman. Haddi cagta sallaanku 4sm ay ka fog tahay salka darbigaJoog intee dhan ayuu gaadhikaraa sallaanku?

h
6 m
4 m

Jaantuska 7.19

Furfuirs: u qaado h joogga darbiga ee sallanku gaadhay.

Fiiri Jaantuska 7.19 kadibna $h^2 + 4^2 = 6^2$

$h^2 = 20 \Rightarrow h = \sqrt{20}$

Sidaa darteed h = $2\sqrt{5}$ m ≈ 4.47   m

Tusaale 5: Jaantuska 7.20 wuxuu muujinayaa saqafka guri. Dhererka tiirka jiifa waa 8m.Tiirasha AC iyo BC waa isle'eg yihiin.Haddii joogga saqafkuuu yahay 1.5m, maxay noqon karaan dhererka tiirasha AC iyo BC?

Jaantuska 7.20

Furfuris: Sida aan ku naqaano astaamaha saddexagal labaale, CD waa kala badhe ku qotoma AB.

Sidaas darteed AD = BD = 4m

$BC^2 = DB^2 + DC^2 = (4^2 + 1.5^2)\ m^2 = 18.25m^2$

$BC = \sqrt{18.25}\ m \approx 4.272\ m$

Tusaale6: Qofayaa u lugeeyay 4km dhinaca bari, ka dibna 5km ayuu u lugeeyay dhinaca koonfu-Fogaan intee le'eg ayuu u jiraa bartii uu kadhaqaaqay?

Furfuris: Fiiri Jaantuska 7.21.

Adiga oo isticmaalaya aragtiinka Pythagoras waxaad helaysaa

$OB^2 = OA^2 + AB^2 = 4^2 + 5^2 = 41$

$OB = \sqrt{41} \approx 6.403\ km$

OB = 6.403 km ayuu u jiraa bartii uu kadhaqaaqay.

Jaantuska 7.21

Tusaale 7: Jaantuska 7.22 waxaa uu soo bandhigayaa xeelad lagu cabbiro ugu dhawaanshaha ballaca haro. Soo saar ugu dhawaan cabbirka ballaca harta?

Furfuris: CD waxay tahay ugu dhawaan cabbirka ballaca harta.

Marka dib loo eego Aragtida joogga waa:-

$CD^2 = AD \times BD$

Maadaama $AB^2 = (12km)^2 + (16km)^2$

$= 144\ km^2 + 256km^2 = 400\ km^2$

Jaantuska 7.22

AB = 20 km

$(16 \text{ km})^2 = BD \times (20 \text{ km})$

$CB^2 = BD \times AB$

$(16 \text{ km}^2) = BD \times (20 \text{ km})^2$

$256 \text{ km}^2 = BD^2 \times 400 \text{ km}^2$

$BD = \sqrt{\dfrac{256 \text{km}^2}{400 \text{km}^2}}$

BD = 12.8 km

AD = AB − BD

AD = 20 km − 12.8 km

AD = 7.2 km

$CD^2 = AD \times BD$

$CD = \sqrt{7.2 \text{ km} \times 12.8 \text{ km}}$

CD = 9.6 km

Weydaarka Aragtiinka Baytagoras

Waxaad soo aragtay saddexagalka dhererka dhinacyadiisuay yihin 3, 4 iyo 5 halbeegyo inuu yahay saddexagal xagal qumman.Tirooyinkaana waxaa la yiraahdaa in ay yihiin saddexleyda Pythagorean.

Qaybtan waxaad ku arki doontaa haddii x, y iyo $z$ay yihiin dhererada dhinacyda saddexagal isla markaana $x^2 + y^2 = z^2$, kolkaa saddexagalku waa saddexagal xagal qumman.

Shaqo-kooxeedka 7.2

Ujeeddo: Si loo darsa weydaarkaaragtiinka Pythagoras iyada oo la sawirayo (ama la dhisayo) saddexagallo lana cabbirayo xaglaha.

Saabaan: mastarad mitir ah, ulo daraf toosan, jiheeye xagalbeeg.

Uidmarin:

1   Diyaari ulo dhereradoodu yihiin sida soo socota.

    b   5sm, 12sm, 13sm   **t**   30sm, 40sm, 50sm   **j**   6sm, 8sm, 10sm

2   Dhis saddexagallo adiga oo isticmaalaya ulaha su'aasha, 1b, t, iyo j.

3   Cabbir xagasha ka soo horjeeda dhinaca ugu dheer ee saddexagal kasta.

4   Adigo oo isticmaalaya natiijooyinka aad ka heshay su'aasha 3, qor hawraar qeexaysa xidhiidhka ka dhexeeya saddexleyda Baytagoras iyo saddexagalka.

Aragtiinka 7.4 (Weydaarka Aragtiinka Baytagoras)

Haddii wadarta laba jibbaarada laba dhinac ee saddexagal ay le'ekaato laba jibbaarka dhinaca saddexaad, markaa saddexagalku waa saddexagal xagal qumman.

Si kale u dhihid. Haddii $a^2 + b^2 = c^2$, markaa m ($\angle C$) = 90°.

Jaantuska 7.23

Tusaale 1: Go'aami mid kasta oo ka mid ah kuwa soo socda in uu yahay iyo in kale saddex layada Pythagorean.

b 2, 3, 4 **t** 10, 24, 26 **j** $2\sqrt{2}$, 1, 3

Furfuris:

b $2^2 + 3^2 = 13$ laakiin $4^2 = 16$

2, 3, 4 ma-ahasaddexleyda Pythagoras.

Saddexagalka dhererka dhinacyadiisu yihiin 2, 3 iyo 4 halbeegyo

ma-aha saddexagal xagal qumman.

t $10^2 + 24^2 = 100 + 576 = 676$

sidoo kale, $26^2 = 676$. Middani waxay muujinaysaa 10, 24, 26 inay tahaysaddexleydabaytagoras.

j $(2\sqrt{2})^2 + 1^2 = 8 + 1 = 9$ sidoo kale $3^2 = 9$.

$2\sqrt{2}$, 1, 3 waa saddexleyda Pythagoras.

Tusaale 2: Haddii 3 sm, x sm iyo 4 sm ay yihiin dhererada dhinacyada saddexagal xagal qumman, raadi qiimaha x.

Furfuris: waxaa ku jira masaladan laba xaaladooda oo suurta gal ah. Shakaalku in uu yahay 4 sm ama x sm. Taasina waxay noqon kartaa x > 4 ama $x < 4$.

Haddii x ay le'eg tahay 3 ama 4 markaa ma noqonayo saddexagal xagal qumman.

Xaaladda koowaad,   *xaaladda labaad.*

$3^2 + x^2 = 4^2$ $x^2 = 3^2 + 4^2 = 25$

$x^2 = 16 - 9 = 7$ $x = 5$

$x = \sqrt{7}$

Sidaas darteed, x waa $\sqrt{7}$ sm ama 5 sm.

Layliska 7.2

1 Isticmaal aragtiinka Pythagoras si aad u hesho dhererka aan laaqoon ee midkasta oo ka mida saddexagallada xaglaha qumman ee soo socda.

b

t

j

x

kh

d

r

s

sh

Jaantuska 7.24

2 Caddee saddexagallada soo socda ee dhererka dhinacyadooda lagu siiyay inay yihiin saddexagallo xaglo qumman iyo in kale.

b   8sm, 15sm, 17sm   **t**   6sm, 9sm, 12sm

j   14sm, 16sm, 18sm   **x**   3sm, $2\sqrt{10}$ sm, 7sm

kh   21 sm, 4sm, 25sm   **d**   2sm, 3.75sm, 4.25sm

3 Raaddi dhererka loo baahanyahay.

b Intee in le'eg ayuu gaadhayaa joogga sallaanka?

t Waa intee dhererka dhinac kasta?

b

t

13m

5m

3 cm

4 cm

STOP

Jaantuska 7.25

4 Raadi dhererka xaglo-gooyaha laydi dhererka dhinacyadiisu ay yihiin $\sqrt{7}$ sm iyo 3sm? Jantus 7.26?

5 ABCD waa koor labaale dhinacyadeeda barbarada ahina ay yihiin $\overline{AB}$ iyo $\overline{CD}$. Haddii AB = 16 sm, CD = 8 sm iyo AD = 5 sm.

Raadii joogga barbaroolaha.

6 Tiro kasta oo tirsiimo k, caddee in 3k, 4k, 5k ay tahey saddexleyda baytagoras.

7 Jaantuska 7.27 ΔABC waa saddexagal xagal qumman.Raadi qiimayaasha x iyo y.

A

D

5sm

x

y

C

E

B

12 sm

Jaantuska 7.27

7.2 HORDHACA TIRIGONOMETERI

Waxaad ku soo baratay shaxanada isu.eg iyo xaglaha aragtiinka Pythagoras iyo xarrijimaha aan sitoosan loogu cabbiri karin fogaanada aan lahelikarin sida joogga fiinta dhagax-weyn, geedka weyn iwm iyada oo la isticmaalayo xaglaha iyo xariijimaha ayaa si toos ah loo cabbirikaraa.

Cutub-hoosaadkan, waxaad ku baran doontaa hab dheeraad ah oo lagu heli karo xaglaha iyo xarriijimaha si aan toos ahayn.

7.2.1   Saamiyada tirigonometeri

Hawl-galka 7.4

Tixaac Jaantuska 7.28 ka jawaab midkasta oo kamida su'aalaha ku saabsan ∆ABC.

1   Dhinacee ayaa ah shakaal?

2   Dhinacee ayaa kasoo horjeeda∠B?

3   Dhinacee ayaa kasoo horjeeda∠A?

Jaantuska 7.28

Dhinaca dariska la ah xagasha fiiqan ee saddexagal xagal qumman waa dhinaca xagasha aan laxiriirin shakaalka.

4   Waa kee dhinaca dariska la ah∠B?

5   Waa kee dhinaca dariska laah∠A?

Hawlgalka 7.4 wuxuu kaa caawinayaa inaad kala cadayso dhinaca dariska iyo dhinaca kasoo horjeeda ∠B sidaku cad Jaantuska 7.29.

$\overline{AB}$ waa shakaal.

$\overline{AC}$ waa ka soo horjeedaha ∠B.

$\overline{BC}$ waa dhinaca dariska la ah ∠B.

Jaantuska 7.29

Halkan waxaad ku baran doontaa nidhiidhks ka dhexeeya dhinacyada lagu magacaabo shakaal, horjeeda iyo daris kuwaas oo la nidhiidha xagasha fiiqan ee saddexagal xagal qumman.

Xusuustaariikheed

Shaqo-kooxeedka 7.3

Ujeeddo: Si loo soo saarosayn, kosayn iyo taanjant kuwaas oo la xiriira xagasha fiiqan ee saddexagal xagal qumman iyada oo la cabbirayo dhererada dhinacyada.

Saabaan: Mastarad ku salaysanmitir, xaglo-beeg, jiheeye, kalkuleetar iyo warqad laba jibbaarane.

Jidmarin:

1 Ku guuriJaantuska 7.30warqada labajibbaaran kadibna koox ahaan uga shaqeeya.

2 Adiga oo isticmaalaya mastarad, cabbir dhererrada shakaalada, dhinacyada kasoo horjeeda iyo dhinacyadda dariska la ah ∠O ee∆AOP, ∆BOQiyo∆COR adiga oo qaadanaya cabbirka ugu dhaw ee milimitirka.

Jaantuska 7.30

Ku guuri tusaha 7.3, isla markaana gali natijooyinka.

Dhinac	Dhererrada ∆AOP	Dhererrada ∆BOQ	Dhererrada ∆COR
Shakaal			
Horjeede			
Daris			

Tusaha 7.3

3 Adiga oo isticmaalaya dhererada iyo kalkuleetar raadi mid kasta oo kamida saamiyada soo socda ee∠O. Ku guuri tusaha 7.4 kadibna gali natiijooyinka.

Saami	Kusaabsan ΔAOP	Kusaabsan ΔBOQ	Kusaabsan ΔCOR
$\dfrac{\text{Horjeeda}}{\text{Shakaal}}$			
$\dfrac{\text{Daris}}{\text{Shakaal}}$			
$\dfrac{\text{Horjeedo}}{\text{Daris}}$			

Tusaha 7.4

4   Waa maxay xiriirada ka dhexeeya natiijooyinka tusaha 7.4. Qor hawraarqeexaysa xiriiradaas.

5   Caddee adiga oo isticmalaya xaqiiqda inΔAOP, ΔBOQ iyo ΔCOR ay yihiin saddexagallo isku jaad ah (isu – eg).

Shaqo-kooxeedka 7.3 dhererka saamiyada ee $\dfrac{\text{Horjeede}}{\text{Shakaal}}$, saamiga dherer $\dfrac{\text{Daris}}{\text{Shakaal}}$ iyo saamiga dhere $\dfrac{\text{Horjeede}}{\text{Daris}}$ waxaaloo yaqaanaa saamiyada tirignomatariga ee saddexagal xagal qumman. heerkan, waxaad ku haysataa qeexida saamiyada tirigonomatariga ee saddexda ah kuwas oo kala ah: sayn, kosayn, iyo tangant kuwaas xagasha fiiqan ee saddexagal xagal qumman.

Qeexid 7.1 *U tixgali saddexagal xagal qumman ABC.Fiiri* Jaantuska 7.31.

i   *Saynka ∠A, waxaa loosoo gaabiyaa "sin A" waxaana loo qeexaa sidan:*

$$\sin A = \frac{\text{dhererka dhinaca ka soo horjeeda } \angle A}{\text{dhererka shakaalka}} = \frac{a}{c}$$

ii   *Kosaynka ∠A, waxaa loo soo gaabiyaa "kosayn A" waxaanaloo qeexaasidan:*

$$\cos A = \frac{\text{dhererka dhinaca dariska la ah} \angle A}{\text{dhererka shakaal ka}} = \frac{b}{c}$$

Jaantuska 7.31

iii Taanjantiga $\angle A$, waxaa loo soo gaabiyaa "tan A" waxaa loo qeexaa sidan:

$$\tan A = \frac{dheerarka\ dhinaca\ ka\ soo\ horjeeda\ \angle A}{dherarka\ dhinaca\ dariska\ la\ ah\ \angle A} = \frac{a}{b}$$

F.G **1** Sin A, cosA iyo tan A, waxaa loola jeedaa cabbirka xagasha $\angle A$.

2 xagal kasta oo fiiqan θ, maadaama shakaalkuinuu yahay dhinaca ugudheer, $0 < \sin\theta < 1$ iyo $0 < \cos\theta < 1$.

Qormo: Dhererrada dhinacahorjeedaha, dhinaca dariska iyo shakkalka waxaa loo soo gaabiyaa lior, darj,shak.,sida ay u kala horeeyaan..Fiiri Jaantuska 7.32.

Saamiyada tirigonometariga seddexda ah la xiriira xagasha $\angle A$

Si fudud waxaa loo muujin karaa sidan:

$$\sin A = \frac{horj}{shak}$$

$$\cos A = \frac{dar}{shak}$$

$$\tan A = \frac{horj}{dar}$$

Jaantuska 7.32

Tusaalaha 1: Jaantuska 7.33, ΔABC waa saddexagal xagal qumman cabbirka xagashiisu $(\angle C) = 90^o$, AC = 4 sm iyo BC = 3 sm.

Raadi **b** sin A, cos Aiyo tan A.

t sin B, cos B iyo tan B

Jaantuska 7.33

Furfuris: Sicad oo badhax laAB = 5 sm

b $\sin A = \dfrac{4}{5}$ **t** $\sin B = \dfrac{3}{5}$

$\cos A = \dfrac{3}{5}$ $\cos B = \dfrac{4}{5}$

$\tan A = \dfrac{4}{3}$ $\tan B = \dfrac{3}{4}$

Tusaalaha 2: Haddii A iyo B ay yihiin xaglo is-dhammaystiro, ma runbaa

$$\sin A = \cos B, \cos A = \sin B \text{ iyo } \tan A = \frac{1}{\tan B}?$$

Furfuris: Eeg ΔABC ee ka muuqda Jaantuska 7.34

$$\sin A = \frac{a}{c} = \cos B, \cos A = \frac{b}{c} = \sin A \text{ iyo } \tan A = \frac{a}{b} = \frac{1}{\left(\dfrac{b}{a}\right)} = \frac{1}{\tan B}$$

Tusaalaha 3: Raadi saamiyada tirigonomatarigaee saddexda ah ee laxiriira xagasha fiiqan θ sida ku cad Jaantuska 7.35 hoose

Jaantuska 7.35

Furfuris: BC = 12 marka loo eego aragtiinka Pythagoras

$$\text{sayn } \theta = \frac{5}{13}, \text{ kosayn } \theta = \frac{12}{13} \text{ iyo } \tan \theta = \frac{5}{12}.$$

Tusaalaha 4: Saddexagalka ΔABC, caabirka$(\angle C) = 90^{o}$ iyo $\sin A = \frac{40}{41}$. Raadi

a sayn B   **b** kosayn B   **c** taan B

Matahay suurtagal in la helo dherarka shakaalka? Sharax

Furfuris: Sawir saddexagalka ΔABC, cabbirka xagasha m$(\angle C)$ iyo $\frac{BC}{AB} = \frac{40}{41}$

Halka saddexagal ee suurtagalka ah waa midka kamuuqda Jaantuska 7.36. Adigo oo isticmaalaya aragtiinka Pythagoras waxaad helaysaa

$$AC^2 + 40^2 = 41^2$$
$$AC^2 = 41^2 - 40^2$$
$$AC^2 = 1681 - 1600$$
$$AC = \sqrt{81}$$
$$AC = 9$$

Jaantuska 7.36

Tan waxaad ka helaysaa,

b sayn B = $\frac{9}{41}$ **t** kosayn B = $\frac{40}{41}$ **j** tan B = $\frac{9}{40}$

F.G: *Haddii aad ku dhufato dhererrada dhinac kata eeΔ ABC* Jaantuska 7.36, *tiro togan sida* 2×9, 2×40, 2×41*mar labaad waxay ku siin saddexagal xagal qumman kaas oo dherarrada dhinacyadiisu yihiin*18, 80, 82.

Ama haddii aad ku dhufato $\dfrac{1}{2}$, *dherada dhinacyadu waxay noqonayaan*4.5, 20, 20.5; *saddexagalku wali waxaa uu ahaan saddexagal xagal qumman.*

Sidoo kale saamiyada tirigonomatariga isma bedelayaan.

Matalan, sin B = $\dfrac{18}{82} = \dfrac{9}{41}$, $\sin B = \dfrac{4.5}{20.5} = \dfrac{9}{41}$. Laakiin baaxadda saddexagalka ayaa is badelaysa. Sidaa darteed dherarka shakaalka way is badasha saddexagal ilaa saddaxagal.

Tusaalha 5: Jaantuskan 7.37 wuxuu muujinayaa in ay jiraan laba saddexagal xaglo qumman. Raadi sine, cosine iyo tangent ee xaglaha cabbirkoodu yahay α, β iyo θ sida muuqata.

Jaantuska 7.37

Furfuris: Marka ugu horraysa waxaad raadisaa dhererada AD iyo BC adiga oo isticmaalaya aragtiinka baytagoras.

$$AD^2 = AB^2 + BD^2 \qquad\qquad BC^2 = BD^2 + DC^2$$
$$AD^2 = 1^2 + 2^2 \qquad\qquad BC^2 = 2^2 + 1^2$$
$$AD^2 = 5 \qquad\qquad\qquad BC^2 = 5$$
$$AD = \sqrt{5} \qquad\qquad\qquad BC = \sqrt{5}$$

i $\quad \sin \alpha = \dfrac{AB}{AD}$

$\qquad \sin \alpha = \dfrac{1}{\sqrt{5}} = \dfrac{\sqrt{5}}{5}$

$\qquad \sin \beta = \dfrac{DC}{BC}$

$\qquad \sin \beta = \dfrac{1}{\sqrt{5}} = \dfrac{\sqrt{5}}{5}$

ii $\quad \cos\alpha = \dfrac{BD}{AD}$

$\qquad \cos\alpha = \dfrac{2}{\sqrt{5}} = \dfrac{2\sqrt{5}}{5}$

$\qquad \cos\beta = \dfrac{BD}{BC}$

$\qquad \cos\beta = \dfrac{2}{\sqrt{5}} = \dfrac{2\sqrt{5}}{5}$

$$\sin \theta = \frac{BD}{BC} \qquad\qquad \cos \theta = \frac{DC}{BC}$$

$$\sin \theta = \frac{2}{\sqrt{5}} = \frac{2\sqrt{5}}{5} \qquad\qquad \cos \theta = \frac{1}{\sqrt{5}} = \frac{\sqrt{5}}{5}$$

iii $\tan \alpha = \dfrac{AB}{BD} \qquad\qquad \tan \beta = \dfrac{BC}{BD} \qquad\qquad \tan \theta = \dfrac{BC}{DC}$

$\tan \alpha = \dfrac{1}{2} \qquad\qquad\quad \tan \beta = \dfrac{1}{2} \qquad\qquad\quad \tan \theta = 2$

Layliska 7.3

1 Raadi saynka, kosaynka, iyo tangantiga xagasha calaamadaysan ee Jaantuska 7.38.

b **t** **j**

x **kh**

Jaantuska 7.38

2 Geed jooggiisu yahay 15m ayaa hadh 10m ah ku sameeyey dhulka. Raadi xagasha taanjentiga ee uu geedku kaga samaysay fallaadhaha cadceedda?

3 Raadi saynka xagasha ka samaysantay dhinaca labajibbaaran iyo xaglo-gooyaha.

4 Sallaan 9 mitirah ayaa lagu tiiriyay darbiqotoma. Haddii tanjantiga xagasha kasamaysantay sallanka iyo dhulka ay tahay 0.35, joog intee dhan ayuu sallanku ka gaarayaa darbiga?

7.2.2 Qiimayaasha saynka, kosaynka iyo taanjentiga ee xaglaha 45°, 30° iyo 60°

Xaglaha gaarka ah ee cabbirkoodu yahay 30°, 45° iyo 60° waxaa loo isticmaalaa adeegsiyada laxiriira tirigonomatariga. Sidaa darteed, saamiyada tirigonomatariga ee sadexda ah ee laxiriira xaglahaas waxaa lagu lafa guri qaybtan.

Hawl-galka7.5

Ujeedo: In lahelo saynka, kosaynka, iyo taanjantiga ee xagasha 45°

Saabaanka: Mastarad kusalaysan mitir iyo, xaglo-beeg.Sawir sadexgal, xagal qumman ΔABC kaa soo m(∠C) = 90°, AC = BC = 10 sm.

Jidmarin:

1 Raadi dhererka shakaalka.

2 Raadi cabbirka xaglaha∠A iyo ∠B.

3 Raadi qimeyaashe sayn kosayn iyo taanjenti ee xaglaha∠A iyo ∠B.

4 Qor bayaan qeexaya natiijooyinka su'aasha 3.

Hawlgalka 4, waxaad ku soo baratay saynka, kosaynka iyo taanjentiga xaglaha fiiqan ee sadexagal labaalaha, xagasha quman marka dhererka lugihiisa lagu sargooyo 10 sm.

Bal hadda aynu eegno sadexagal labaalaha xagasha qumman ΔABC kaas oo $m(\angle C) = 90^o$ iyo AC = BC = $x$halka$x$tahay tiro togan oo maangala. *Fiiri* Jaantuska 7.39.

$$AB^2 = AC^2 + BC^2$$
$$= x^2 + x^2$$
$$= 2x^2$$
$$AB = \sqrt{2x^2}$$
$$= x\sqrt{2}$$

Jaantuska 7.39

Sida muuqata $m(\angle A) = m(\angle B) = 45^o$.

Sidaas darteed qiimayaasha∠Aiyo∠B waa isku mid.

$$\sin A = \frac{BC}{AB} = \frac{x}{x\sqrt{2}} = \frac{1}{\sqrt{2}} = \frac{\sqrt{2}}{2}$$

Sidoo kale, $\cos A = \dfrac{AC}{AB} = \dfrac{x}{x\sqrt{2}} = \dfrac{\sqrt{2}}{2}$

$\tan A = \dfrac{BC}{AC} = \dfrac{x}{x} = 1$

Si loo fududeeyo xisaabintan qaado $x = 1$, marka AB = $\sqrt{2}$.

Waxaana lagu soo koobay sidan:

i $\quad \sin 45^\circ = \dfrac{\sqrt{2}}{2}$ **ii** $\quad \cos 45^\circ = \dfrac{\sqrt{2}}{2}$ **iii** $\quad \tan 45^\circ = 1$

Tusaalaha1: Raadi dhererada maqan ee Jaantuska 7.41 adiga oo isticmaalayasaamiyada tirigonometariga.

Jaantuska 7.40

Furfuris:

b $\tan 45^\circ = \dfrac{8\text{ cm}}{y}$

$\quad 1 = \dfrac{8\text{ cm}}{y}$

$\quad y = 8\text{cm}$

$\sin 45^\circ = \dfrac{8\text{ cm}}{x}$

$\dfrac{1}{\sqrt{2}} = \dfrac{8\text{ cm}}{x}$

$x = 8\sqrt{2}\text{ cm}$

t $\sin 45^\circ = \dfrac{h}{10\text{ cm}}$

$\dfrac{\sqrt{2}}{2} = \dfrac{h}{10\text{ cm}}$

$h = 10\left(\dfrac{\sqrt{2}}{2}\right)\text{cm}$

$\quad = 5\sqrt{2}\text{ cm}$

$\tan 45^\circ = \dfrac{h}{z} = 1 = \dfrac{5\sqrt{2}}{z}$

$z = 5\sqrt{2}\text{ cm}$

$\tan 45^\circ = \dfrac{x}{10\text{ cm}}$

$1 = \dfrac{x}{10\text{ cm}}$

$x = 10\text{cm}$

Tusaalahe 2: Sallaan lagu tiiriyay darbi ayaa la sameeyay xagal 45° ah dhulka. Cagta sallaanka 4m ayay ka fogayd salka cirifka darbiga. Adiga oo isticmaalaya saamiyada tirigonomatariga ka jawaab mid kasta oo kamida su'aalaha soo socda.

b Joog intee dhan ayuu sallaanku ka gaadhi karaa darbiga:

t Raadi dhererka sallaanka?

Furfuris: Siloo furfuro meseladan tallaabada ugu horraysa waa in la sawiro jaantus muujinaya sallaanka iyo cirifka darbiga. Fiiri Jaantuska 7.41.

Jaantuska 7.41

b $\tan 45^o = \dfrac{BC}{AC}$

$$\dfrac{\sqrt{2}}{2} = \dfrac{BC}{4}$$

$$BC = 2\sqrt{2} \text{ m}$$

t $\cos 45^o = \dfrac{AC}{AB}$

$$\dfrac{\sqrt{2}}{2} = \dfrac{4}{AB}$$

Sidoo kale, $\dfrac{1}{\sqrt{2}} = \dfrac{4}{AB}$

$$AB = 4\sqrt{2} \text{ m}$$

Qiimeyaasha sayn, kosayn iyo taanjentiga ee xaglaha 30° iyo 60°

Hawl-galka7.6

Ujeedo: Si loo helo sayn, kosayn iyo taanjantiga xaglaha 30° iyo 60°.

Saabaan: Mastarad ku salaysan mitir, jiheeye iyo xaglo-beeg.

Jidmarin:

1 **b** Sawir goobo gacankeedu yahay 4 sm xudunkeedu yahay barta A, islamarkaana u qaado "t" inay yihiin baro kasta oo ka midah goobada dusheeda.

